



Dembiyada ardeyda dugsiga lagaga Joojineyo ama Caydhineyo oo kooban

Caydhintu waxaa weeyaan“ marka ardeyga gacanta ku haynta maamulka shaqaalaha dugsiga laga saaro.” Ardeyda dugsiga laga caydhiyo kama qeybgeli doono barnaamij ama dhacdo kasta oo ay degmadu qabaneyso, waxaana ka mid ah barnaamijka waxbarashadda madaxa bannaan. Nidaamka Maamulka ee tirsigiisu yahay 6295 wuxuu si buuxda u sharaxayaa sharciga degmada u dejisan ee ku saabsan caydhinta, sidoo kale Nidaamka Degmada ee tirsigiisu yahay 6290 wuxuu isna sharaxaad ka bixineyaa Nidaamka dugsi ka Joojinta. Dugsiga ayaad labadaasba ka codsan kartaa ama waxaad ka fiirin kartaa shabakada Internetka ee degmada (website) oo ah www.sandi.net/policy.

Ardeyga dugsiga lagama joojin karo ama laguma talin karo in dugsiga laga caydhiyo ilaa Madaxa Waxbarashadda ama maamulaha dugsiga ilmuhu uu dhigto ay ogaadaan in ardeydu hal ama in ka badan uu ku xad gudbey waxyaabahan soo socda oo keeni kara in ardeyga dugsiga laga joojiyo ama la caydhiyo.

- **Gardaro ku weerarid/Garaacida-** waxaa ka mid ah inaad qof kale u geysatid ama aad isku deydid inaad dhaawac jidheed u geysato, ama si ula kac ah qof kale xoog u sheegasho ama rabshadeyso, taas oo aan ahayn isdifaacis shakhsiyeed; gardaro ku weerarid ama garaacid shaqaalaha, sameyn ama isku deydid weerar garadaro ah oo faraxumeyn ah ama qof garaacid si aad u faraxumeysid.
- **Hubka-waxaa** ka mid ah haysashada, iibinta iyo isticmaalka qori kasta oo baaruud leh, mindida, waxyaabaha qarxa, ama walax kasta oo khatar ah oo kale.
- **Maandooriyaasha, Khamriga ama Nooc Kasta oo waxyaabaha Miyirka qaada ah-waxaa** ka mid ah si sharci-daro ah u haysashada, isticmaalka, iibinta, ay walxahanu ama sheyadanu kuu keenaan. Waxaa intaas dheer, marka koowaad iyo marka labaad haddii lagugu arko adiga oo haysta wiiqiyad (culays aad u yar oo le’eg 20 giraam) oo maandooriyaha marjuwaanada loo yeqaano dugsiga waa lagaa joojineyaa, marka saddexaad ee lagugu arko adigoo haysta, isticmaaleya, ama ay jidhkaaga ku jirto waxay sababi kartaa in dugsiga lagaa eryo.
- **Waxyaabaha khamriga/Walxaha la diidan yahay beddelkooda noqon kara-** Si maandooriye ama khamri ahaan ah lagu siiyey, aad u haysatid ama aad u iibsatey.
- **Boob ama baad-** waxaa ka mid ah isku deyida boobka iyo dhac wax ku qaadashada(baada)
- **Waxyeleynta Dugsiga ama Hantida Gaarka ah-**isku deyida ama waxyeelo gaadhsiinta.
- **Xatooyada Hantida-**isku deyida wax xadista, wax xaday, ama qaadashada wax la soo xaday.
- **Tubaakada-Haysashada,** qaadashada, habbeynta iyo gorgortanka iibinteeda.
- **Fusuqa/Diin caayista/Ciyaal-suuqnimada-**sameynta fal fusuqnimo ah, iyo si joogto ah diinta ugu gefid ama ku kicitaan falal edebdarro iyo ciyaal-suuqnimo ah.
- **Qalabka ama walxaha Maandooriyaasha-**Haysashada, qaadashada, habbeynta iyo gorgortanka iibinteeda.
- **Rabshada, Madax-adayga-**Si ula kac ah u rabshida hawlaha dugsiga ka socda ama ku madax-adayga madaxda shaqaalaha dugsiga.
- **Fara-xumeynta (Fasalada 4aad-12aad)-**waxaa sababtaas dugsiga looga eryi karaa oo keliya ardeyda fasalada 4aad ilaa iyo 12aad.
- **Rabshadda Nac ama Colaad ku jirto (Fasalada 4aad –12aad)-**sameynta, ku hanjabida inaad sameyneysid, isku deyida inaad sameysid, ama ka qeyb qaadashada fal noocaas ah. Ardeyda ku jirta fasalada 4aad ilaa iyo 12aad oo keliya u baa sababahaas dugsiga looga eryi karaa.
- **Hanjabaada iyo Argagixinta-**dhibaateynta, cabsi galinta, ama hanjabaada loo geysto ardeyga markaati ka ahaa marka nidaamka anshaxeed la fulineyo ama ka aargoosashada ardey markaati noqdey darteed.
- **Dhibaateynta (Fasalada 4aad –12aad)-**dhibaateynta, cabsi galinta, ama u hanjabista ardey ama koox ardey ah ama shaqaalaha dugsiga oo saameyn dhab ah ku leh (1)carqaladynta hawlaha fasalka, ama (2) abuuritaanka xaalad qallafsan, ama (3) abuuritaanka xaalad cabsi

OO KOOBAN

- ❖ Ardeyga dugsiga lagama joojin karo ama laguma talin karo in dugsiga laga caydhiyo ilaa Madaxa Waxbarashadda Degmada ama maamulaha dugsiga uu ilmuhu dhigto ay ogaadaan in ardeygu hal ama in ka badan uu ku xad gudbey waxyaabaha sababaya in dugsiga laga joojiyo ama laga caydhiyo ee Nidaamka Maamulka ee tirsigoodu yahay 6295 ama 6290
- ❖ Sida uu dhigeoyo nidaamka “Waxyaabaha aan loo dulqaadan karin” waxaa jira dembiyada noocyo ka mid ah oo dugsiga ama dhismaha dugsiga dhexdiisa ah haddii lagu sameeyo oo isla markiiba lagu talo-bixineyo in ardeyga dugsiga laga joojiyo ama laga eryo.
- ❖ Ardeyna dugsiga lagama joojin karo ama lagama caydhiin karo fal kasta uu sameeyo haddii uusan ahayn mid la xidhiidha hawlaha dugsiga ama imaanshaha dugsiga.
- ❖ Gudiga Waxbarashadda Degmada oo keliya ayaa ardeyga dugsiga ka caydhiin kara.

Somali Version: OFFENSES LEADING TO SUSPENSION

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawigalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.



galineysa jawiga waxbarasho. Ardeyda fasalada 4aad-12aad oo keliya un baa sababahan lagu eryi karaa.

- **Walxaha u eg Qoryaha baaruuda leh**-Haysashada walxaha u eg qoryaha baaruuda leh.
- **Shaqaalaha dugsiga ama Hantida dugsiga falal aragagaxiso iyo cabsi galin leh kula kicid** -Qoraal kasta ama odhaah kasta oo si u kas ah dembiyo loogu sameynayo, kuwaas oo sababi kara dhimasho, dhaawac culus iyo waxyeelo weyn oo soo gaadha hantida dugsiga.
- **Dawooyinka la isu qoro**-Haysashada, iibinta, ama isku deyida iibinta dawooyinka la isu soo qoro ee Maandooriyaasha ah.

Ardeyna dugsi loogama joojin karo ama loogama eryi karo liiska falalka kor xusan awgood, haddii aysan falalkaasi la xidhiidhin dhacdooyinka dugsiga ama imaanshaha dugsiga. Ardeyna dugsiga lagama joojin karo ama loogama eryi karo falalkaas kor ku xusan marnaba, waxaana ka mid ah aanse ku xadidneyn, (a) marka uu dugsiga joogo; (b) marka uu dugsiga u sii socdo ama ka soo socdo; (C) xilliga qadada, dhismaha dugsiga ama ka baxsanba; (d) Marka uu u sii socdo ama ka soo socdo dhacdooyinka uu dugsigu uu qabto. Haddii ardeyda isagoon dugsiga joogin la xidho, markaas dugsiga waa laga joojineyaa ama marka uu dugsiga ku soo laabto ayaa dugsiga laga joojineyaa.

Dembiyada lagu galo dugsiga dhexdiisa ama dhacdooyinka uu dugsigu meel dhismaha dugsiga ka baxsan ku qabto waxay si dhakhso ah u sababi karaan sida uu qoreyo “Nidaamka waxyaabaha aan loo dulqaadan karin” in ardeygaas dugsiga laga joojiyo ama dugsiga laga eryo. Wixii warbixin dheeraad ah waxaad ka fiirisaa Nidaamka Maamulka ee tirsigiisu yahay 6295 ee SDCS.

Dembiyada dhammaan ardeyda qabaneya

- **Haysashada, iibinta ama haddii kale haysashada qoryaha baaruuda leh** (sida ku qeexan 18 ee Qoddobka Sharciga Maraykanka ee 921)
- **Qof kale mindi ku fiigista.** (“mindi” waxaa loola jeedaa wax kasta oo wax lagu mudo, ama hub kale oo af fiqan leh oo loogu talagalay in wax lagu mudo, ama hub leh makiinad ka dheer 31/2 hiish ah, mindi isku soo laabanta oo leh makiinad meel lagu geliyo leh, ama makiinad aan heerarka dhererkeedu ku qoreyn.)
- **Si sharcidarro ah u iibinta waxyaabaha aan la oggoleyn** (oo ku taxan Qoddobka Sharciga ee Caafimaadka iyo Badbaadada 11053 et seq.)
- **Fara-xumeynta ama Garaacista**
- **Haysashada waxyaabaha qarxa**

Ardeyda Dugsiga Sare

- **Hubka, falalka rabshada badan iyo dagaalka badan.** Ardeyda dugsiga dhexe ama sare ee muddo hal sanno dhexdeeda ah saddex jeer ama in ka badan dagaal dhawaac sababa geysata ama dugsi kale u tallaaba oo dhib ka geysta waxaa laga yaabaa in dugsiga laga joojiyo ama lagu taliyo in dugsiga laga eryo. Ardeyda u soo qaadata dugsiga qoryaha baaruuda leh, mindida, waxyaabaha qarxa, ama walxaha khatarta ah waa lagu talin doonaa in dugsiga laga joojiyo ama dugsiga laga eryo. Nidaamka waxyaabaha aan loo dul qaadan karin awgeed, walax kasta oo loo isticmaali karo in wax lagu handado, waxaa loo qaadeneyaa inuu hub yahay, xaataa haddii uusan caadi ahaan hub ahayn. Haddii ay ardeydu jebiyaan sharciga oo lagu arko iyagoo hub sita, waa in Booliska Dugsiga ama Booliska San Diego la ogeysiiyaa ama loo sheegaa.
- **Khamriga, tubaakada, iyo maandooriyaasha kale.** Nidaamka degmada ee u dejisan haysashada ama iibinta waxyaabaha aan la oggoleyn ee ka baxsan inta shakhsi ahaan in loo isticmaalo la oggol yahay waxaa marka koowaad lagu talineyaa in dugsiga laga eryo, iyo marka saddexaad jebinta sharciga ku saabsan isticmaalka ama haysashada waxyaabaha aan la oggoleyn, ee aysan tubaakadu ku jirin; marka afraad jebinta sharciga taas oo ay tubaakadu ku jirto, waxaa ardeyga dugsiga laga joojineyaa muddo (5) maalmood ah, iyadoo weliba lagu talineyo in dugsiga laga eryo.
- **Boobka ama baada**
- **Geysashada dhaawac halis ah**
- **Shaqaalaha Dugsiga gardaro ku weerarida ama garaacid**
- **Haysashada ama iibinta waxyaabaha wax kale u eg/ qoryaha carruurto ku ciyaaraan ee aan asalka ahayn.**

Guddiga Waxbarashadda ee Degmada un baa ardeyda dugsiga ka eryi kara. Go'aanka Guddiga Waxbarashadda Degmada ee ku saabsan in ardeyga dugsiga laga eryo waa inuu ku salleysan yahay caddeymo la hor keeno Guddiga Baadha Eriska ardeyda.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Somali Version: OFFENSES LEADING TO SUSPENSION

Warbixinta kala Xidhiidh: Xafiiska Meeleynta iyo Racfaanka (619) 725-5660

Su'aalaha Warbaahinta (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.